



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Heestii Sakima

Skriven av: Ursula Nafula

Illustrerad av: Peris Wachuka

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 4.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv>

Heestii Sakima



✎ Ursula Nafula
📧 Peris Wachuka
📄 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 3





Sakima wuxuu la noolaa waalidkiisa iyo walaashiisa afar jirta ah. Waxay ku noolaayeen dhulka ninka hodanka ah. Mundul kooda cawska ah waxuu ku yaalay meesha ugu dambeysa geedaha safan.



Ninkii taajirka ahaa waxuu aad ugu farxay in uu mar kale arko wiilkiisa. Waxuu abaalmaryey Sakima qalbiga uu dajiyay awgeed. Wuxuu isbitaalka u qaaday wiilkiisa iyo Sakima si Sakima na uu dib ugu helo aragiisa.

Marku Sakima ahaa saddex jir, ayuu xanuunsaday oo aragiiisii wayay. Sakima wuxuu ahaa wiil yar oo heybad leh.




Wagtiga xaadirka ahaa, laba nin ayaa yimid iyaga oo qof ku wado naxash. Waxay soo heleen ninkii taajirka ahaa wiilkiisa oo la garaacay loo gana tagay wadada dhinacda.






Sakima waxuu sameeyay waxyaabo badan oo wiilasha da'doodu tahay lix sano jir aysan sameynin. Tusaale ahaan, wuxuu la fadhiisan karay dadka waa yeelka ah ee tuulada waxuuna kala xaajoon jiray arrimaha muhiimka ah.



Sakima wuu dhameysatay heestiisi uu heesayay waxa uu na u jeestay in uu tago. Laakiin ninkii taajirka ahaa ayaa banaanka si degdeg ah ugos baxay oo wuxuu ku yidhi, Fadlan markale hees.




Waalidiinta Sakima waxay ka shaqayn jireen guriga ninka hodanka ah. Waxay ka tagi jireen guriga arortii, waxayna soo laaban jireen fiidkii. Sakima waxaa looga tagi jiray walaashiisa yar.




Shaqaalihii way joojiyeen wixii ay sameynayeen. Waxay dhagaysteen heesta Sakima ee guruxda badan. Laakiin hal nin ayaa yiri, "Qofna ma awoodin in uu dajiyo booska. Wiilkan indhoolaha aha ma waxuu u maleynayaa inuu dajin doono?"



Sakima wuxuu jeclaa in uu ku heeso heesaha. Maalin maalmaha ka mid ah, waxay hooyadiis weydiisay, "Halkee baad kaso barataa heesahan, Sakima?"



Waxa uu hoos istaagay daaqad weyn wuxuuna bilaabay in uu ku heeso heestiisi uu ugu jeclaa. Si tartiib ah, madaxa ninki hodanka ah ayaa bilaabay in uu kasoo muuqdo daaqadi weynayd.



Sakima wuxuu ku jawabay, "Way iska imadaan, hooyo. Waxaan ka dhex maqlaa madaxayga dabadeedna waan ku heesaa."




Maalintii xigtay, Sakima wuxuu walaashiisii yarayd weydiistay in ay u wado ninkii taajirka ahaa gurigiisa.



Sakima wuxuu jeclaa in uu u heeso walaashiisa yar, gaar ahaan, haddii ay dareento gaajo. Walaashiis waa ay dhageysan jirtay isaga oo heesayo heestiisa ugu macaan. Waxaa soo jiidan codka cod macaan leh.



Si kastaba ha ahaatee, Sakima ma niyad jabin. Walaashiisii yarayd ayaa ku taageertay isaga. Waxay tiri, "Sakima heestisa way idajisaa markaan gaajoonayo. Wayna dajin doontaa ninka taajirka ah."



“Ma heesi kartaa mar kale, Sakima,”
walaashiis ayaa ka baryi jirtay. Sakima waa
uu ka aqbalaa oo ku celceliyaa heesta
marar badan.



“Waan u heesi karaa isaga. Waxaa laga
yaabaa in uu markale farxo,” Sakima ayaa
waa ay eryeen. “Waa nin aad taajir u ah,
waxaad tahay wiil indho la. Ma waxaad u
maleynysaa in ay heestaada caawin
doonto?”



Hal fiid markii ay waalidkiis guriga ku soo laabteen, ayay aad u aamusnaayeen. Sakima wuxuu oгаа in ay wax qaldan jiraan.



“Maxaa qaldan hooyo, aabe? “Sakima ayaa waydiiyay. Sakima wuxuu oгааday in wiilka ninkii hodanka ahaa uu maqan yahay, ninku wuxuu ahaa mid aad u murugooday oo cidloobay.